Somaliska
Bra bostad

Ummadda idil waxay xaq ku lee yihiin hoy wanaagsan

17ka sebteembar oo ku aadan maalinta doorashada, waxaa go'aan laga gaari doona mustaqbilka dalka Iswiidan, xilkaasuna wuxuu saaran yahay adiga iyo aniga ba. Dhammaanteenna waxaa dusha naga saaran isla xilkaas. Codkaaga iyo kayga waa isku qiimmo. Haddaba miyaan kor u qaadna horumarka heerka sare ah, mise hoos ayaan u dhigna, anagoo karoonka shanaad ee canshuurta ka saarno khasnadda aanu wadajirka u leenahay? Miyaan horumarinaa hab-noleedka dalka Iswiidan – mise dusha ayaan u dhignaa?

Haddii aanu nahay xisbiga socialdemokratiga waxay nala tahay in hoy helida ay tahay xaq-bulshodeed. Ummadda dalka Iswiidan ku nool dhammaantood waa in ay helaan hoy wanaagsan, kiradiisa-na ah macquul. Hoyga wuxuu muhim u yahay abuurida xaalad nololeed loo wada siman yahay oona karaamo ku salaysan. Sidaas awgeed, waxaa loo baahan yahay siyaasad wax ka qabato suuqa aqallada, kaaso aanan ku ekeyn dhulhelid. Siyaasadda aqaladda waa siyaasad khuseeysa dhammaan. Haddaba sida lagu dangaaro awgeed, waxaa loo baahan yahay muruqgelin dheeraad ah, sida in dhallinyarada, waayeelka iyo dadka aanan hoyga lahayn xaq ay ku helaan hoy.

Lama oran karo suuqa aqallada wuu wanaagsan yahay, maxaayeelay waxaa jirto dad tiro badan, siiba dumarka iyo waayeelka, oo badbaadinxuummo degmooyinkooda ka dareemaayo. Sidaaso kale ma wanaagsana markii da'yar qaangaar ah lagu dirqinaayo in ay la noladaan waalidkooda hoy la'aan dartiisa. Qofka markii u qaangaaro una doonaayo innuu waalidiintiisa ka guuro waa innuu helaa fursad u ku helo hoy u gaar ah, iyo kiro u iska bixin karo.

Haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad ah mise aad dooneeyso inaad xubin ka noqoto xisbig aocialdemokratiga, booqo hoyga Internetka ee socialdemokratigana.se mise wac taleefanka 08-700 27 27

Damaanada kirada waxay wanaajisaa fursada helida aqalka ugu horreeyo
Dhallinyarada damacsan in waalidiintooda ka guuran waxay ka welwelsan yihiin in hoy laga kirayn. Maxaayeelay, shirkadaha aqallada laga kireeysto waxay ka welwelaan in kirada annan la bixin maadaama da'yarku u san haysan shaqo joogto ah. Isla dhibaatooyinkaas ayee la kulmaan dhallinyarada awooda in ay iska bixiyaan kirada, taaso u sabab ah shuruuda adaga ee shirkadaha aqalada laga kireeysto.

Haddaba sida dhallinyarada aan ugu fududeeyno aqal kireeysashada, waxaanu doonayna in an hirgelinoo taageero dhaqaaleed degmooyinka doonaayo in ay adeegsadaan habka loo yaqaanno "hyresgaranti" damaanada kirada. Macneehedu waxay tahay in maamulka degmada u ballanqaadayo bixinta kirada haddii da'yarku uu kirada iska bixin waayo.

Guryo cusayb ah, tiro badan oona la kireeysan karo
Haddii aanu nahay xisbiga socialdemokratiga waxaan doorashadii 2002 ballanqaadnay in la dhiso guryo cusayb ah, kuwaaso tiradooda gaareeyso 120 000, laguna dhiso afarta sano ee ku xigtay. Guryo tirodas ka badan ayaa la dhisay. Laakinse nagu ma filna. Sida wax looga qabto baahida weyn ee dadweynaha waa in dhismaha aqalada marna la joojin, siiba kuwa la kireeysto.

Haddaba fulinta dhismaha aqaladda ee aanan kharashka badnayn, wa in wax laga qabtaa dhaqaalaha dalka Iswiidan iyo korsaaro hooseeya. Laakinse waxaa loo bahan yahay hab lagu maalgeliyo dhismaha aqalada, kaaso suurtagelin doono in dadweynaha dhammaantod ay awoodan iska bixinta kirada, korsaarada iyo kharashyada – imminka iyo mustaqbilka. Kharashka aqal dhisida waa in hoos loo dhiga. Waxaan dagaal ku qaadi doona keli haystonimada iyo heshiisyada sharcidarrada ah ee laamaha gacsiga dhismaha aqalada. Waxaan kalo doonayna in an kodhinno qaybinta dhulalka qaranka iyo degmooyinka ay lee yihiin. La soo gaabiyo xilliga qorsheha dhismha iyo wanajinno fursadda ay dadweynaha degmada ku nool ugu qaybqaadan lahaayeen qorsheha iyo dhisida aqalada.

Waxaan ku dhaqaaqi doona dhib u dhisida aqalladayda iyo dib u hagaajinta xaafadahayga
Inkasto anaga, haddii an barbardhigno dalal kale, annu leenahay aqallo wanaagsan, haddana hawllo badan baa na sugaysa in annu ku dhaqaaqno. Bulshada gooni goonida u degen way adag tahay sidii wax looga qaban lahaa. Qoysas carruur leh oo tiro badan, siiba kuwa asalkooda dal shisheeye ka yimi, kuma filna hoygooda. Waxaan kalo aad ugu baahannahay dib u habayn. Shan iyo tobbanka ila labaatanka sannad oo socda waxaa dib loo dhisi doona aqallo tiradooda ka badan nus maljon, siiba goobha barnaamijka miljanka. Xilliga dib u dhisida aqaallo tiro badan waxaa loo dhisi doona hab isticmaalka korontada hoos loogu dhigo.

Aqal kireeysashada waa xaqa dadweynaha
Sida loogu ciribtiro bulshada kala degen awgeed, waa in xaafadahayga laga hela hoy siyaabo kala duwan loo kireeysto, sida; kuwa la kireeysto “hyresrätter”, kuwa la iibsado “bostadsrätter”, kuwa is-kaashatada ah “kooperativa hyresrätter” iyo aqalada gaar ahaanka loo lee yahay.

Waa in hab fudud aqal loo raadsan karo, waa in wab aanan mugdi ku jirin loo soo bandhiga shruuda aqal kireysashada. Waxaa loo baahan yahay adeeg wanaagsan oo loogu talaggalay aqal-raadsadeyada, kuwaaso jooga degmo kasto, teeda kale tilaabooyin culculus waa in laga qabtaa kala soca suuqa aqallada. Kireysashada aqalka waa in ay suurtagashada ummadda dhammantood. Sidaas awgeed, waxanu doonayna in an horumarinno aqallada degmooyinka laga lee yahay – ee ma aha in aan iibinno. Aqallada degmooyinka laga lee yahay waa damaanada lagu helo karo aqalaa la kireeysan karo, siiba magaallooyinka waawayn.

Wax ku bediladeeda
Siyaasadayda ku salaysan mabda in ummadda dalka Iswiidan ku nool ay dhammaantood helaan hoy wanaagsan, kiradiisa-na ah macquul, waxaa ka soo horjeeda siyaasadda isbahaysiga midigta ee xisbiga moderaterna u hogaamiyo. Xisbiga moderaterna wuxuu doonayaa in uu hirgelyo kirada suuqa, la iibiyo aqallada loogu talaggalay kirada, iyo in hoos loo dhigo taageerada bulshada ee ku wajihan aqal dhisida. Isbahaysiga midigta ee xisbiga moderaterna u hogaamiyo waxay hogaamiyaan siyaasad ku salaysan in wax ka qabadka bulshada hoos loo dhigo, oo kolba la kordhiyo shuruuda hadba suuqa ka jirta.

Isbahaysiga midigta ee xisbiga moderaterna u hogaamiyo wuxuu doonaya in la dhiso aqallo dhaqaale ahaan laga faa’iideysto, kuwaaso ay degi karaan kireesteyaal laga faa’iideysan karo.

Dalka Iswiidan anagu aanu maamuli doono waa loo dhan yahay, adigu-se dalkee dooratay?